

Hala ogaado ra'iyiadaada xiliga Doorashada Dawlada Hoose:

- U sheeg musharrixiinta wixii aad wax ka qabtid waydi-ina waxay qaban-doonaan hadii la doorto.
- Fiirso fiidiyowga fariinta dumarka u dirayaan musharrixiinta – www.cawi-ivtf.org
- Taageer olole musharrax.
- La wadaag qoraalkan dad kale.
- Cod-kaaga bixi Oktoobar 25 keeda.
- Caawi dadka kale si ay cod-kooga u bixiyaan.

CAWI (City for All Women Initiative): CAWI (Waxqabadka Horeeya ee Haweenka Magaalada) waa wax wada-qabsasho u gaar ah haweenka ka kale socda beelo kala duwan, ururo,iyo aqoon-yahano la shaqeeynaya cida ay talada dawlada hoose ka go'do si ay u abuuraan magaalo loo wada siman-yahay oo kor u qaada sinaanta jinsiga.

**Wixii macluumaad ee dheraad
ah kala xiriir:**

CAWI, www.cawi-ivtf.org

City of Ottawa, www.ottawa.ca,

Telefoonka: 311



City for All Women Initiative
Initiative: une ville pour toutes les femmes



COD-BIXINTAYADU WAY TIRSAN TAHAY

Dumarku way u Fiirsanayaan Doorashada Dawlada Hoose



Waxa soo saaray:

City for All Women Initiative (CAWI)

Initiative : une ville pour toutes les femmes (IVTF)

Caawimada maalgalintu waxay ka timid Ontario Trillium Foundation,
Community Foundation of Ottawa Coalition of Community Health and
Resource Centres, 2010

Language: Somali

Maxaad Cod kaaga u bixinsaa Doorashooyinka Dawlada Hoose?

Oktoobar 25 keeda, 2010, muwaadiniinta degan Ottawa waxay tegi doonaan goobaha cod-bixinta doorashada.

Waxan dooran doonaa rag iyo dumar wakiilo inooga noqon-doona Golaha Deegaanka ee Magaalada (24 xubnood: Duqa Magaalada iyo 23 xubnood oo guddiga deegaanka ka tirsan oo ka socota xaafad kasta) oo hayn-doona xilkaas 4ta sannadood ee soo socota.

Waxay go'aamin-doonaan qaraaro saameynaya maalin-nololeed-keena.

Waxay go'aamin karaan inay kor-dhiyaan ama dhimaan:


- Fiida lagu bixiyo isticmaalida meelaha lagu ciyaaro ama isboortiga lagu sameeyo,
- Adeegyada daryeelka ilmaha
- Wadooyinka basaska
- Canshuuraha
- iyo wax badan oo kale...

Hadaad tahay ruux dumar ah oo ka soo jeeda dadka aslka ah ee Oborginalka, ama kooxaha kala duwan ee kooban, ama muhaajiriinta dhawaanta timi, oo ku nool saboolnimo ama naafo ah, lagama yaabo in aad ku aragtid dad kula mid-ah Guddiga Deegaanka markaa waydii in ay wakiil kaa noqonayaan.

Hada ayaad fursad haysataa in aad xaqiijisid in ay kaa wakiil noqodaan.

Hadaba aan doorano musharrixin wakiil-inaga noqda oo isku taxalujiya waxa aan tabanayno.

City for All Women Initiative (CAWI)



Sidilaad Codkaaga u Bixin Lahayd?

Sida aad codkaaga doorashada dawlada hoose u bixin-kartid waa in aad noqotid:

- Qof degan Magaalada Ottawa, ama leh ama kiraysta dhul ka tirsan Magaalada, ama ay is qabaan qofkaa leh ama kiraysta dhul;
- Muwaadin Kaeediyaan ah;
- Jira ugu yaraan 18 sanno, iyo;
- in-aan xilligan lagu xukumin dambi.

Is-diiwaan gelin si aad codbixin u sameysid:

- Hadaad hore u diiwaan-gashaneyd, waxad boosta ka heli doontaa kaadhka codbixinta oo kuu sheegi-doona goorta iyo halkaad ku codbixinaysid. Soo qaado kaadh-kaas marka aad codkaaga bixinaysid.
- Hadii aanad diiwaan-gashanayn ama aad u baahan tahay inaad beddeshid macluumaad-kaaga gaar ahaaneed, waxad samey kartaa marka codkaaga aad bixinaysid. Waxa lagu waydiin-doona in aad buuxisid laba foom iyo in aad tustid dadka shaqeynaya 2 dukumenti oo magacaaga iyo cinwaan-kaagu ku qoran-yihiin, sida leysinka baabuur wadida iyo/ama biilasha guriga.
- Si aad uga hor-tagtid in uu dib u-dhac ku timaado maalinta codbixinta, ka soo qaado kobbi foomka, "Arjiga ku darida ama wax ka badalidaa liiska cod-bixiya yaasha, xarunta Adeegyada ruuxa loo adeego ama ka daabaco hal foom Ottawa.ca wixii ka dambeeya Sebteber 7eeda.

Macluumaad Dheeraad ah oo Doorashada ku sahabsan:

- Kala xiriir Xafiiska Doorashooyinka ee Magaalada 613- 580-2660 (TTY:613-580-2401) e-mail:elections@Ottawa.ca
- Kala xiriir Magaalada TelefoonKa 3-1-1 (TTY:613-580-2401)
- Siyaaro websiteka Magaalada www.ottawa.ca.

City for All Women Initiative (CAWI)

Sidee-Baan u Go'Aansadaa Qoka Aan Codbixin-Tayda Siinayo?

Xaafad kastiba waxay ugu yaraan leedahay hal musarrax oo u ordaya Guddiga Deegaanka ee Magaalad, iyo musharrixiinta Duqa Magaalada.

Ka bilaw in aad iswey-diisid , qofka aad jeclaan-lahayd in uu wakiil kaaga noqdo Guddiga Deegaanka ee Magaalada.

Qof ah...



- Daacad
- Ka hadal arrimaha muhiimka kuu ah adiga iyo beeshaada
- Dhegaysta beesha
- Ka qayb-qaata munaasabadaaha beeshas
- La-shaqeeya kooxaha kale duwan ee beesha oo ay ka mid yihiin ururada Dumarku
- U la xiriira si haboon xubnaha beeshoo idil
- Wakiil ka ah jinsiyada midabka leh ama dhaqanka kooban
- Ruux dumar ah
- _____

Tan labaad, waxad iswaydiisaa , waxyaabaha aad wax ka qabtid ee aad jeclaan-lahayd in uu qofkaasi wax ka qabto?

1. _____
2. _____
3. _____

Dooro Musharrixaaga:

Si aad u heshid musharrixiinta la magacaabay, waxaad gashaa websitka Magalada Ottawa. – www.ottawa.ca.

Xulo musharrixa sida ugu fiican wakiil kuugu noqon-kara ee wax ka qabankara waxayaaba aad wax ka qabtid.

- Waydii waxa ay dadka kale ka ogyihiin musharrixaaga.
- Raadi cida iyaga taageersant.
- Akhri joornaalka si aad u ogaatid waxa ay musharrixiintu yidhaahaan.
- Ka dhageyso ra'yiya-dooda idacada iyo telefisyoonka.
- Ka daawo musharriinta hada ka tirsan Golaha Deegaanka ee Magaalada, adigoo ka daawanaya shirarka Golaha Rogers Cable 22 (Cable 23, Faransiis) ama adigoo ka qaybgala shir Golaha Deegaanka Magaalada.
- Ku qor musharrixa magaciisa internetka si aad u aragtid website-kooda ama liiska hawlaha beelaha ee ay is ku taxalujayaan.
- Teg shirarka musharrixiinta si aad u dhageysatid waxay leeyihiin.



Saameyn Ku Yeelo Musharraxiinta


Marka aan dareen-siino qadiyadaha musharraxiinta, waxbaan barnay oo waxan saameyn ku yeelanay barnaamijyada doorashada.

Weydii musharraxiintu waxay sameyn-doonaan hadii la doorto:

Magacaygu waa...waxan ku noolahay xaafada aad ugu sharaxantahay Guddiga Deegaanka ee Magaalada. Waxan daneynayaa waxan aan qabaa waa wax ahamiyad u leh beeshayada (qoys-kayga, urur-kayga) maxa-yeelay...Maxaad hadii lagu doorto adigu ka samey lahayd ?

Meesheen ku waydiiyaa su'aashan musharraxiinta?

- Wax ku waydii musharaxa talafoon, e-mail, faagas ama warqad.
- Waydii wax marka uu musharraxiinta ama ruux kale oo ka socda ololahu uu albaab- kaaga yimaado.
- Ku soo casum musharraxa urura-kaaga ama munaasabad beeshaadu leedahay.
- Waydiiso in shirarka guud ee musharraxiinta oo idil lagu qabto xaafadiina.
- U abaabul shir musharaxa.
- Casuum dad aad taqaan si aad su'aasha u waydiisid (sii muunad, fariin teleefoon ah, ama warqad).
- U qor warqad isku-duba-ridaha joornaalka.



Su'aalaha ad Waydiin Kartid:

Waa kuwan qaar ka-mid-ah su'aalaha dumarku ay musharraxiinta waydiina-yaan. Waxaad waydiin-kartaa su'aalahan mid ka-mid-ah amaba waxaad diyaarsan-kartaa mid aad leedahay.

KIRADA GAADIIDKA

Ilaa 2006 kii, qiimaha lacagta lagu raaco basaska Ottawa waxuu kor u kacayay 7.5% sannad kasta, , Ottawana si joogto ah ayuu qiimaha basasku aad ugu sareeyay Canada. Mudadaas dakhliyada intooda badan wax yar bay kaceen hadii ay kor u kaceenba. Isla markaa kirada basasku waxay kor u kacday in ka badan 2 iyo badh jibaar inta ay maciishadu kacdo sannad kasta iyada oo islamarkaa dariiqyada baska qaar la joojiyay adeegyana la dhimay. Kordhinta kirada basasku waxay aad u saameysay dad badan oo aan aqaan. Markii ay qiimaha kirada basaku sidan kor uga sii socoto, gaadiidku wuxuu noqoday mid aan dad badani awoodi Karin. Taasna waxay ka dhigantahay in aan dad badani shaqo tigi karin, ama ka qayb qaadani Karin xarumaha ciyaaraha iyo isboortiga ama waxba ku kordhin karin nolosha magaaladeena. (Ama waxad diyaarsan tusaalooyin aad leedahay)

SU'AAL: miyaad adigu hada balan qaadeysaa in aad intii awoodaada ah in aad hubisid kirada basasku in ay san dalcmin, ama haday kor u kacdo , in-aany ka badan inta maciishadu kacdo?



Su'aalaha ad Waydiin Kartid:

GURYO AMAAN AH OO KIRADOODA LA AWOODI KARO

2009 kii, waxaa liiska sugi-taanka guryaha Ottawa ee la kabo ku jiray 10,235 qoys. Sannadaas, waxaa guryo la siiyay 1,842 qoys waxana la dhisay 88 guri oo qudha kuwa la kabo.

(Tusaale ka bixi raadka ay arrintani ku yeelaneyso adiga ama dad aad taqaan.)

Guryaha amaanka ah ee kiradooda la awoodi-karaa waxay dadka awood-siiyaan in any wax soo saaraan iyo in ay wax ku kordhiyaan beesha. Dhaqaaluhu wuu xoogeystaa beeluhuna way caafimaad qabtaa.

SU'AAL: miyaad balan-qaadaysaa in aad la shaqaysid Guddiga Geegaanka si loo gaadhsiiyo 1000 guri tirada guryaha la kabo sannad kasta ilaa 4ta sannadood eed joogtid? Miyaad hubinaysaa in ay guryahani diyaar u noqonayaan dadka dhakhli-goodu uu yahay ama ka hooseeyo ka ugu mushahar yar?



Su'aalaha ad Waydiin Kartid:

DARYEELKA CARRURTA

Dayrtan, waxay Guddiga Gobalka Ontario hirgelinaysaa in dugsiyada barbaarinta carrurta yar-yar ee 4 iyo 5 sanno jirta la dhigdoono maalintii oo dhan. Arintani waxay isbedel ku keenaysaa nidaamka daryeelka carrurteena iyo kabida dhaqaale ee ay u ogoaato waalidiinta danyarta ah in ay awoodaan daryeel tayo leh.

Waa masuuliyada Magaalada Ottawa in ay isku-duwid ku sameyso qorshaha marxaladan kala guurka ah si ay u hubiyaan in ayna qoysasku waayin gooba-hoodii iyo kabidii ay heli jireen.

Helitaan daryeel carruureed oo la awoodi karo iyo helitaan kiisuba waa u muhiim waalidiinta si ay ugu soortawdo in ay shaqaoyin-kooda haysan karaan, una kaalmayn karaan qoysaskooda. Waxaan doonaynaa in aan hubino in carrurteenu ay helaan daryeel amaan ah, oo tayo leh sannadaha hore.

SU'AAL: marxaladan kala guurka ah ee dugsiyada barbaarinta carruurta yar-yar, si-deebaad adigu u hubinaysaa in Magaaladeenu ay fursad u qaadato si ay u hour-mariyaan nidaamka daryeelka carruurta si ay u noqoto mid ay awoodaan, oo ushaqaysa qoysaska goorta iyo halka ay ugua baahan yihiin? Miyaad hogaamiye u noqonaysaa daryeelka carruurta?



Su'aalaha ad Waydiin Kartid:

CIYAARAHHA IYO ISBOORTIGA


Dadka degaanada guriya danyarta ih, ma haysataan meelo ay ku ciyaaraan ama isboorti ku suubiyaan oo ay dhalinyarada iyo dadka waaweyniba tagi-karaan. (Keenso adigu tussala-haaga)

Baararka qaarkood amaan maaha. Fiida adeegyada meelaha lagu ciyaaro ee Magaaladu kor by u sii socotaa, taas oo keentay in ay dad badani awoodi karin. Dad badani kama warqabaan kabida dhaqaale ee loo fidiyo danyarta ku nool magaalada ama waa ay ka xishoodaan in ay waydiistaan.

Waxa jirta xalado u baahan lacag yar. Tusaale, meelo dhalintu ku ciyaari-karto oo aan toos ahayn, ama meelaha guud ee lagu sameeyo shirarka beesha.

Waxan ku faraxsanahay in Magaaladu ay sameyneyso qorshe weyn oo madadaalada ah oo leh u jeedo in ruux kastiba ka qaybqaadan karo.

SU'AAL: Maxaad sameyn kartaa si uu qorshahani u suurtoobo? Maxaad sameyn kartaa si aad u hubisid in dadka danyarta ihi ay baararka, meelaha lagu ciyaaro isboortika iyo meelaha kaleba ay fursad u heli-karaan?



Taageer Musharraxa Aad Rabtid

La xiriir xafiiska ololaha musharraxaaga oo waydii sida aad u caawin lahayd ololaha.

Waxyaabaha aad gurigaaga ku sameyn kartid:

- Teleefoono dir
- Cuf boqshado
- Qor waraaqo
- Turjum qoraalo
- Ku dhaji calaamado meelo

Waxyaabo aad beesha dhexdeeda aad ka qaban kartid:

- Qaybi qoraalo
- Ku dhaji calaamado meelo
- La hadal jaarkaaga
- Caawi dadka si ay cod-kooga u bixiyaan
- Ku dhiirigeli in dadka kale hawsha ka qayb qaataan

